

SOMALI

Marka cunuggaagu helo fursadda wehelinta muddada oktoobar ilaa maajo!

Shimbiryare wuxuu ka shaqeeyaa _____ iskaashiga Carruurta iyo agaasinka sinnaanta.

Shimbiryare wuxuu nidaamwehelin ka abuuraa machadka sare ee Malmø kuna yaal Iswiidhan. Halkaas waxaa weheliye u gaar ah ka heley 1000 arday hal sano dugsiyeed tan iyo 1997. Shimbiryare wuxuu maanta ka jiraa toddoba dal oo Yurub ah.

Shimbiryare wuxuu cunugga jira 8-12 sano oo asal ahaan laga tiro badan yahay ka helayaa deeq wehelin sanad dugsiyeedka gudihiisa. Qofka cuggaaga wehelinaya wuxuu tixgelin siinayaa rabitaankiisa, baahidiisa iyo hiwaayaddiisa.

Cunuggaaga iyo qofka wehelinaya waxay kulmayaan hal mar toddobaadkii waqtiga dugsiiga kaddib, qiyaastii labo-seddex saacadood. Waqtiga kulanka waxaa wadajir u go`aaminaya idinka iyo weheliyaha. Waa muhiim inaan cunugga lagu mashquulin hawlo badan oo kale si uu waqti ugu helo la kulanka weheliyaha.

Qofka weheliyaha u ah cunuggaaga wuxuu wax ka bartaa _____. Weheliyeyaashu waxay si joogto ah u helaan talasiin iyo gunnosiin la xiriirta shaqadooda. Inta aan la shaqaaleyn weheliyaha waxaa la baaraa xogtiisa. _____ waa la wareytaa ardada waxaana la baaraa xogtooda iyo asluubtooda inta aysan noqon weheliyeyaal.

Cunuggaaga wuxuu kaloo yeelanayaa qof kale oo weyn oo la socda saaxiibna la noqda. Qofkan weyn wuxuu noqon doonaa mid leh wax-ku-oolnimo cunuggu ku deydo. Weheliyaha iyo cunuggu waxay wadajir u go`aansanayaan waxa ay qaban doonaa. Waxay ku kulmi karaan, tusaale ahaan, guriga mid iyaga ka mid ah amase waxay ka qaybqaadan karaan hawlaha kala duwan ee waqtiyada firaaqada. Ujeeddadu waa in uu jiro waxqabad caadi ah oo aan kharaj kallifen. Shimbiryare wuxuu kaloo u abaabulayaa carruurta iyo weheliyeyaasha shaqooyin wadaag ah oo lacag la`aan ah, tusaale ahaan, daawasho filim amase booqasho masrax. Dhammaan carruurta iyo weheliyeyaashu waxay ka caysan yihiin shilalka waqtiga ay kulmayaan.

Weheliyuhu waa lacag la`aan. Taas beddelkeeda wuxuu waalidku amase mas-uulka cunugu bixinayaan, tusaale, baska/trikk iyo evt. Lacagta gelintaanka hawlqabadka.

Nattergalen ved Nord Universitet
E-post; yan.zhao@nord.no Yan Zhao

Telefoon

75517438/90761476

